

# Brown County Health & Human Services

## Public Health Division

### Tallaalka COVID-19

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo (FAQ's) – Janaayo 4, 2021

#### **Sidee lagu ogaan karaa cida marka hore qaadan doonta tallaalka?**

Taasi waxaa go'aan ka gaari doona saraakiisha federaalka iyo kuwa gobolada kuwaas oo doortay habab wajiyo badan leh. Weji kastaa waxaa la qorsheeyey dad gaar ah iyadoo lagu salaynayo halista iyo soo-gaadhista cudurka. Haatan waxaa jira saddex waji: 1A, 1B, iyo 1C.

#### **Yaa lagu soo dari doonaa Wajiga 1A ee dadaalka tallaalka?**

Wejiga 1A wuxuu ka koobnaan doonaa Shaqaalaha Daryeelka Caafimaadka (HCP) iyo dadka degan / shaqaalaha ka ah Xarumaha Daryeelka Muddada-dheer (LTCF).

#### **Yaa lagu soo dari doonaa Wajiga 1B ee dadaalka tallaalka?**

Wejiga 1B wuxuu ka koobnaan doonaa Shaqaalaha Muhiimka ah sida ay ku qeexeen saraakiisha faderaalka iyo gobolka. Tusaalooyinka qaarkood ee shaqaalahaas muhiimka ah waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, shaqaalaha sharci-fulinta, waaxda dabka, waaxda waxbarashada, waaxda adeegyada, waaxda gaadiidka, cuntada iyo beeraha.

#### **Sideen ku ogaan karaa haddii aan ahay shaqaale muhiim ah?**

Saraakiisha dawlada dhexe iyo gobolada waxay cadeyn doonaan warshadaha loo arko inay yihiin kuwo muhiim ah maadaama qeexitaankani ka duwanaan karo qeexitaanadii hore ee la isticmaalay. Isbeddelku waxaa ugu wacan helitaanka tallaalka ee ma ahan muhiimada shaqaalaha oo yeraatay.

#### **Yaa lagu soo dari doonaa Wajiga 1C ee dadaalka tallaalka?**

Wejiga 1C wuxuu ka koobnaan doonaa dadka waaweyn ee khatarta sare ugu jira xaaladaha caafimaad ee horay u jiray, iyo sidoo kale dadka waaweyn ee ka weyn da'da 65 sano.

\*Fadlan la tasho daryeel bixiyahaaga caafimaad haddii aad aaminsan tahay inaad qabto xaalad caafimaad oo aad ugu qalmi karto wejigaan.

#### **Hay'ada Caafimaadka Dadweynaha Deegaanka ee Degmada Brown ma haysaa liisaska dadka u baahan tallaalka sababo la xiriira xaalad caafimaad?**

Maya. Hay'ada Caafimaadka Dadweynaha ee Degmada Brown waxay shaqsiyaadka u gudbisaa adeeg bixiyaashooda daryeelka caafimaadka ama hay'adaha kale ee bulshada si ay ugala soo tashadaan xaaladahooda.

#### **Uur ayaan leeyahay ama naas ayaan nuujinayaa, ma qaadan karaa tallaalka COVID-19?**

Hay'ada Caafimaadka Dadweynaha ee Degmada Brown waxay kugula talinaysaa inaad la xiriirto daryeel bixiyahaaga



**Public Health**  
Prevent. Promote. Protect.

**Brown County**  
Health & Human Services

# Brown County Health & Human Services

## Public Health Division

caafimaadka ama xarunta macluumaadka bulshada ee deegaankaaga si aad u hesho macluumaad ku saabsan xaaladaada.

### **Nidaamka difaaca jirkayga waa daciif, miyaan qaadan karaa tallaalka COVID-19?**

Hay'ada Caafimaadka Dadweynaha ee Degmada Brown waxay kugula talinaysaa inaad la xiriirto daryeel bixiyahaaga caafimaadka ama xarunta macluumaadka bulshada ee deegaankaaga si aad u hesho macluumaad ku saabsan xaaladaada.

### **Miyaan tallaalka ka qaadi karaa cudurka COVID-19?**

Maya. Tallaalka kuma jiraan fayras nool. Tallaalku wuxuu jirkaaga ku abuurayaa borotiin kaas oo jirkaaga aqoonsan doono oo sababi doona jawaab xagga difaac jirka ah haddii uu kugu dhaaco cudurka COVID-19 mustaqbalka.

### **Tallaalkee ayaan qaataa?**

Tallaalada imika la ansixiyay, iyo sidoo kale tallaalada ansixinta sugaya, aad ayay waxtar u lahaayeen markii la tijaabinaayay. Xilligan la joogo helitaanka tallaalku ayaa ah qodobka go'aaminaya nooca tallaalka uu qofku qaadanayo.

### **Tallaalku ma yahay mid nabadgeliyo leh/aamin ah?**

FDA waxay u baahan tahay badbaadada iyo waxtarka tallaalka si ay u ansixiso. Madaxweynaha hadda ee Trump, Madaxweynaha la doortay Biden, iyo saraakiisha caafimaadka bulshada Mareykanka ayaa taageeraya tallaalka. Waxbadan ka baro badbaadada tallaalka halkan:

<https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/vaccines/safety.html>

### **Maxay tahay sababta aan u qaadanayo tallaalka haddii aan xiran karo maaskaro oo aan ilaalin karo masaafada kala fogaanshaha bulshada?**

Ciribtirka aafada waxay u baahan tahay in la isticmaalo dhammaan wixii qalab ah ee la heli karo. Tallaalku wuxuu la shaqeeyaa nidaamka difaaca jirkaaga si jirkaagu uu diyaar ugu noqdo inuu la dagaallamo fayraska haddii lagu qaadsiiyo. Tallaabooyinka kale sida xirashada maaskaro iyo kala fogaanshaha bulshada, waxay kaa caawinayaan yareynta fursadaha ah in lagu qaadsiiyo ama aad fayraska ku faafiso dadka kale. Wadajir, tallaalka COVID-19 iyo raacitaanka talooyinka CDC waxay kahortagga ugu fiican kaa siinayaan fayraska.

### **Maxaan sameyn karaa hadda si aan uga caawiyo naftayda kahortagga COVID-19 illaa tallaalka aan ka qaadanayo?**

Waa inaad sii wadaa inaad sankaa iyo afkaaga ku daboosho maaskaro, iska ilaalisoo inaad xiriir dhow la yeelatid dadka xanuunsan, inaad ka fogaato 6 fuudh dadka kale, iska ilaalisoo meelaha dadka badan ama isku imaatinnada waaweyn, gacmahaagana si joogto ah u dhaqidid.



**Public Health**  
Prevent. Promote. Protect.

**Brown County**  
Health & Human Services

# Brown County Health & Human Services

## Public Health Division

### Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan COVID-19 iyo Tallaalka?

Macluumaadka ku saabsan COVID-19 iyo heerka tallaalku uu hadda marayo waxaa laga heli karaa websaydhyada soo socda:

[StayHealthyBC \(browncountywi.gov\)](https://www.browncountywi.gov/stayhealthybc)

[Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee ku saabsan Tallaalka COVID-19 | CDC](https://www.cdc.gov/covid-19/su-aalaha-inta-badan-la-isweydiiyo)

[COVID-19: Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo | Waaxda Wisconsin ee Adeegyada Caafimaadka](https://www.wisconsin.gov/waaxda-wisconsin-ee-adeegyada-caafimaadka)



**Public Health**  
Prevent. Promote. Protect.

**Brown County**  
Health & Human Services